IIB MA GALO

# FAAFIN RASMIAH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 15aad Muqdisho, 1 Jan. 1987 Lr. 1

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda - dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Khasnhuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

# KOBNIIN

## QAYBTA KOWAAD

Sharci L. 1 ee 3 Dis. 1986, Sharciga Machadka Diblomaasiyadda iyo Tababarrada .......................................... 2—10

Sharci L. 2 ee 17 Dis. 1986, Oggolaansho Heshiiska JDS iyo J. Dalka Shiinaha, kuna saabsan Iskaashi Dhaqaale iyo F/mo. ...... 11

Sharci L. 3 ee 15 Dis. 1986, U rogid Sharci , Xeerka Sharci 3 ee 5.10.1986, dib u habeynta Qaanuunka kala wareejinta Hantida Maguurtada ah .......................................... 12—13

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

## QAYBTA LABAAD

Xeer Madaxweynaha JDS L. 1 ee 17 Dis. 1986, Meelmarin Heshiis dhexmaray JDS iyo J. Dalka Shiinaha ................ 14—15

DECRRE No. 1 on 17 Dis. 1986, Instrument of ratification . 15

Xeer Madaxweynaha JDS L. 2 ee 8 Dis. 1986, Magacaabid J.L. Madoobe Nuunoow Maxamed ............................ 16

Xeer Wasaaradda Arr. Gudaha L. 1 ee 30 Okt. 1986, Magacaabid Guddi gurmad heer gobol iyo degmo ................. 17—18

Xeer Gudd. Guddiga Dhexe ee doorashada L. 1 ee 28 Disember 1986 .............................................. 19—20

# QAYBTA KOOWAAD

## SHARCI

**Sharci lambar 1, taariikh 3 Dishembar 1986**
**Sharciga Machadka Dibloomaasiyadda iyo Tababarrada**
**MADAXWEYNAHA J.D.S.**

**ISAGOO TIXGELINAYA:** Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

**WUXUU SOO SAARAYAA:**

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad
**(Abuuridda)**

1. Waxaa halkaan lagu abuuray Machadka Dibloomaasiyadda iyo Tababarrada oo hadda wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono "MACHADKA".

2. Machadku wuxuu u madaxbannaan yahay hawlihiisa, wuxuuna u hoggaansamayaa Sharcigan, Xeerarka iyo Nidaam-hoosaadyada loo dejiyo.

3. Machadku waa hay'ad leh shakhsiyad qaanuuni ah.

Qod. 2aad
**(Awoodda ilaalinta Machadka)**

1. Ilaalinta guud ee Machadka, waxaa yeelanaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda, oo hadda wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono Wasiirka.

2. Wasiirku, markii ay ugu muuqato lagama maarmaan, wuxuu Machadka siinayaa tilmaamo guud oo la xiriira xagga hawlihiisa iyo siyaasadda guud ee uu ku soconayo.

3. Wasiirku wuxuu kaloo awood u leeyahay in uu soo saaro Xeer-hoosaad lagu faahfaahinayo laguna fulinayo Sharcigan.

4. Wasiirku wuxuu qaadi karaa tallaabo kasta oo lagama maarmaan u ah horumarinta Machadka ama saxidda hawlaha Machadka oo la xiriira Sharcigan.

Qod. 3aad
**(Ujeeddada Machadka)**

Ujeeddada Machadka waa in lagu diyaariyo laguna dhiso kaadir aqoon sare leh, dhabna u yaqaan dibloomaasiyadda cilmi

ahaan iyo xirfadba. Ujeeddadaas si loo gaaro, wuxuu Machadku ku shaqaynayaa:

1. In sare loo qaado aqoonta dibloomaasiyiinta ka shaqaysa Wasaaraddan, Ergooyinka, Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

2. In uu siiyo dadka ku soo biira Wasaaradda aqoonta saldhigga u ah dibloomaasiyadda, si ay ugu fududaato garashada xiriirka dawliga ah.

3. In uu ku abuuro ka qayb-galayaasha waddaninnimo, daacadnimada dalkooda, dadkooda iyo dawladdooda.

4. In uu ku beero ka qayb-galayaasha firfircooni, hawlkarnimo iyo aragti siyaasadeed oo ku salaysan maslaxad Qaran.

5. In uu xooggiisa saaro barashada Soomaaliya xagga siyaasadda, dhaqaalaha, nabadgelyada iwm.

6. In uu ku dhiirri-geliyo ka qayb-galayaasha cilmi-baarista, gaar ahaanna uu daneeyo tan la xiriirta barashada Soomaaliya.

7. In uu ku boorriyo ka qayb-galayaasha Diinta Islaamka, oo ku dhaqankeedu yahay ubad-dhexaadka dhaqanka Soomaaliyeed.

8. In uu ku beero ka qayb-galayaasha feejignaan iyo xuuraan, si ay uga digtoonaadaan wax allaale wixii waxyeelleyn kara danaha iyo sharafta dalkooda.

### Qod. 4aad
### **(Noocyada Waxbarashada ee Machadka)**

1. Waxbarashada Machadku waxay noqonaysaa mid :

   b) Akadeemik ah oo u gaara ah Jaamiciyiinta ka shaqeysa ama ku soo biirta Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo qof allaale oo qabtay jago dibloomaasinnimo.

   t) Tababar ah oo u gaar ah qof allaale oo sita Shahaado Dugsi Sare oo ka shaqeeya ama ku soo biira Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

2. Machadka waxaa kaloo loo oggolaan karaa hawl-wadeenno ka tirsan hay'adaha Qaranka oo hawlahoodu xiriir la yeelan kara Barnaamijka Waxbarashada Machadka.

## Qod. 5aad
## (Awoodda Machadka)

1. Machadku wuxuu awood u leeyahay ayadoo la raacayo Sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka u degsan, in uu ku dhaqaaqo wax kasta oo u suuro-gelinaya in uu fuliyo hawlihiisa kuna gaaro ujeeddooyinkii loo abuuray.

2. Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed iyo Machadyada kale ee Dalka ka furan ka sokow, Machadku wuxuu xiriir la yeelanayaa Jaamacadaha iyo Machadyada dawladaha aannu xiriirka la leennahay, isagoo heshiis la gelaaya.

## Qod. 6aad
## (Xubnaha Machadka)

Xubnaha Sare ee Machadku waxay ka kooban yihiin:

B. Golaha Sare ee Machadka;
T. Agaasimaha Guud ee Machadka;
J. Guddiga Waxbarashada;
X. Guddiga Maamulka.

## Qod. 7aad
## (Golaha Sare ee Machadka)

1. Golaha Sare waa hay'adda ugu sarreysa Machadka, wuxuuna ka kooban yahay:

| | |
|---|---|
| — Wasiirka Arrimaha Dibedda | Guddoomiye |
| — Guddoomiyaha Jaamacadda U. Soomaaliyeed | Xubin |
| — Agaasimaha Tacliinta ee Wasaaradda Ar. Dibedda | " |
| — Hormuudka Machadka SIDAM | " |
| — Agaasimaha Guud ee Machadka | Xoghaye |

2. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu khubaro ugu yeero Shirarka Golaha Sare ee Machadka. Khubaradu waxay xaq u leeyihiin in ay doodaha ka qayb-galaan, hase yeeshee, cod ma laha.

3. Goluhu wuxuu Shirkiisa Caadiga ah yee;anayaa lixdii biloodba mar, hase yeeshee, shir aan caadi ahayn ayuu yeelan karaa mar kasta oo uu isugu yeero Guddoomiyuhu.

Qod. 8aad

**(Xilka Golaha Sare)**

Golaha Sare ee Machadku wuxuu qabanayaa hawsha soo socota:

1. Dejinta Barnaamijka Akadeemikada iyo midka tababarka ee Machadka.
2. Dejinta shuruudaha guud ee gelitaanka Machadka.
3. Guddoominta bixinta shahaadooyinka iyo aqoonsiyada kale ee aqooneed ee Machadka.
4. Dhiirri-gelinta cilmi-baarista ee la xiriira dibloomaasiyadda iyo kuwa saameeya ujeeddooyinka Machadka.
5. Qiimeynta hawl-qabadka Machadka ee uu soo hor-dhigo Agaasimaha Guud ee Machadka.
6. Ansixinta heshiisyada lagama maarmaanka u ah barnaamijka socodsiinta hawlaha Machadka.
7. Oggolaanshaha miisaaniyadda ku talo-galka iyo sisaab-xirka sannadeed ee Machadka.

Qod. 9aad

**(Awoodda Golaha Sare)**

Golaha Sare ee Machadku wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:

1. In uu bixiyo deeqo waxbarasho;
2. In uu oggolaado xeer-hoosaadka Waxbarashada ee Machadka;
3. In uu magacaabo abuurana Guddiyo ka kaaliya hawlaha Waxbarashada;
4. In uu aqbalo deeqo;
5. In uu baaris guud ku sameeyo Maamulka Machadka.

Qod. 10aad

**(Agaasimaha Guud)**

Machadku wuxuu yeelanayaa Agaasime Guud ee uu magacaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, isagoo dhegeystay talada uu u soo jeediyo Wasiirka.

Agaasimaha Guud, wuxuu yeelanayaa Ku-xigeen ka kaaliya hawlihiisa, uuna magacaabo Wasiirku.

Qod. 11ad
**(Xilka Agaasimaha Guud)**

1. Agaasimaha Guud waa Sarkaalka ugu sarreeya Shaqaalaha Waxbarashada iyo Maamulka Machadka, wuxuuna Wasiirka talo-ka siinayaa arrimaha saameeya siyaasadda Waxbarashada, Shaqaalaha iyo Maamulka Machadka.

2. Wuxuu Golaha Sare mas'uul uga noqonayaa habsami-u-socodka hawlaha iyo ku-dhaqanka Sharciyada iyo Xeerarka u degsan.

3. Wuxuu metelayaa isaga iyo ciddii kale ee loo wakiisho Machadka xiriirka Hay'adaha Qaranka iyo kuwa shisheeye ee uu iskaashiga la leeyahay.

4. Wuxuu mas'uul ka noqonayaa hab-asluubeedka Machadka dhexdiisa, isagoo soo saaraya nidaam-hoosaad ku lug leh, isla markaasna hirgelinaaya Sharciyada iyo Xeerarka Machadka.

5. Wuxuu ka saxiixayaa magaca Machadka heshiisyada uu dhinac ka yahay Machadku, isagoo haysta oggolaanshaha Wasiirka.

6. Wuxuu ka qaadayaa tallaabooyin Maamul iyo Asluubeed Shaqaalaha iyo Ardayda Machadka, isagoo raacaya Sharcigan, Sharciyada iyo Xeerarka kale.

7. Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta hawl-maalmeedka iyo xisaab-aha Machadka si waafaqsan hay'adaha madaxbannaan.

8. Wuxuu fulinayaa tilmaamaha guud ee ka soo fula Wasiirka iyo Golaha Sare ee Machadka.

9. Wuxuu qabanayaa hawlaha kale ee Sharcigan iyo (Xeer-nidaamiyaha Machadka loogu xilsaaray.

Qod. 12aad
**(Guddiga Waxbarashada)**

Iyadoo aan wax loo dhimeyn awoodda Golaha Sare, tan Agaasimaha Guud iyo tan fulinta, lana dhawrayo qodobbada Sharcigan, hawlaha Waxbarashada ee Machadka waxaa loo xilsaaray Guddiga waxbarashada ee ka kooban:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Agaasimaha Guud | Guddoomiye |
| 2. | Ku-xigeenka Agaasimaha Guud | Xubin |
| 3. | Agaasimayaasha Waaxyaha | " |
| 4. | Barayaasha Machadka | " |
| 5. | Ciddii kale ee loo garto. | |

Qod. 13aad

**(Hawlaha Guddiga Waxbarashada)**

Hawlaha Guddiga Waxbarashada Machadku waxay yihiin:

1. Fulinta Siyaasadda Waxbarashada Machadka iyo Go'aannada Golaha Sare.

2. In uu habeeyo Shahaadooyinka (Marag-kac) ama aqoonsiyada kale ee tacliimeed, oo ku xusan qodobka 8aad.

3. In uu abaabulo siminaarro lagu tababaro Shaqaalaha Waxbarashada Arrimaha Dibedda guud ahaan.

4. In uu qorsheeyo Kormeerna ku sameeyo habka imtixaanaadka.

5. In uu ilaaliyo qalabka Machadka ee Waxbarashada.

6. In uu dhiirri-geliyo horumarinta cilmi-baarista xiriirka dawliga iyo dhaqdhaqaaqiisa kala geddisan.

7. In uu diyaariyo barnaamijka waxbarashada una gudbiyo Golaha Sare.

8. In uu soo dejiyo wax-ka-beddelka barnaamijka waxbarashada uuna u gudbiyo Golaha Sare.

Qod. 14aad

**(Guddiga Maamulka)**

Guddiga Maamulku wuxuu ka kooban yahay:

| | | |
|---|---|---|
| b) | Agaasimaha Guud | Guddoomiye |
| t) | Ku-xigeenka Agaasimaha Guud | Xubin |
| j) | Agaasimayaasha Waaxyaha | " |

Qod. 15aad

**(Hawlaha Guddiga Maamulka)**

Hawlaha Guddiga Maamulku waxay yihiin:

b) Diyaarinta Barnaamijka Hawl-sannadeedka ee la hordhigayo Golaha Sare;
t) Dib-u-eegidda iyo qiimeynta barnaamij-hawleedka ee la oggolaaday;
j) Abuuridda kooxo loo xilsaaro hawlo cilmi-baaris xiriirka dawliga ah, isagoo u magacaabaya kooxo kasta ciddii hoggaamin lahayd;
x) Diyaarinta miisaaniyadda ,achadka iyo u gudbinta Golaha Sare;
kh) Wixii hawlo kale ah ee loo xilsaaro.

Qod. 16aad

**(Waaxaha machadka)**

Machadku wuxuu yeelanayaa Waaxyo kala duwan. Tirada Waaxyaha iyo hawlahaba, waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

Qod. 17aad

**(Gunnooyinka)**

1. Gunnooyinka Agaasimayaasha iyo Shaqaalaha kale, waxaa lagu caddeynayaa Xeer Wasiir.

2. Haddii ay lagama maarmaan noqoto Machadku wuxuu qoran karaa Macallimiin Soomaaliyeed ama Shisheeye oo joogto ah ama waqti dhiman ah, isagoo heshiis la gelaya.

Qod. 18aad

**(Hantida Machadka)**

Hantida Machadku waxay ka kooban tahay:

1. Qaybta ka imaanaysa Miisaaniyadda Qaranka.

2. Wixii dakhli ah ee soo gala dhaqdhaqaaqa Machadka.

3. Wixii deeqo ah ee ka yimaada gudaha ama dibedda.

Qod. 19aad

**(Sannad-Miisaaniyadeedka)**

Sannadka Maaliyadeedka, Machadku wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo ee sannad kasta, wuxuuna dhammaanayaa 31ka Dishember ee sannad kasta.

Qod. 20aad

(Afafka Waxbarashada)

Afafka Waxbarashadu waxay noqoneysaa Ingiriisi iyo Carabi.

Qod. 21aad

(Shaabadda Machadka)

Machadku wuxuu yeelanayaa shabaado u gaar ah ee lagu sunto warqadaha rasmiga ah ee ka soo baxa.

Qod. 22aad

(U Noqosho)

Wixii aan sharcigan lagu xusin kuna saabsan tacliinta iyo cilmi baarista waxa la raacayaa Sharciga Jaamacadda Ummadda, haddii tacliintu ay tahay mid Akademik ah. Haddii tacliintu ay tahay mid tababar ah waxaa la raacayaa Sharciga Machadka "SIDAM".

Qod. 23aad

(Dhaqan gelid)

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3 Dec 1986

Madaxweynaha J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 2 ee 17.12.1986
Oggolaanshaha Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dalka Shiinaha, kuna saabsan Iskaashi shaqaale iyo farsamo.

ISAGOO TIXGELINAAY Aoggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimowraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dalka Shiinaha, kuna saabsan Iskaashiga xagga dhaqaalaha iyo farsamo, laguna siinayo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya amaah lacageed oo aan dulsaar lahayn gaareysana 50.000.000 (konton milyan) oo ah Renminbi Yuan.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho marka taariikhdu ahayd 23 maarso 1986.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku tilmaaman Qod.1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.12.1986

Madaxweynaha J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre

Sharcigan lambar 3, taariikh 15.12.1986
U rogid sharci, Xeer sharci lambar 3 ee 5.10.1986 iyo dib u habeynta Qaanuunka kala wareejinta Hantida Maguurtada ah.

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay sharci, Xeerka-sharci lambar 3 ee 5.10.1986 "fasiraad sharci", isagoo dib loo habeeyey loona akhriyi doono sida soo socota;

a) Qodobka 1aad ee Sharci lambar 67 ee 2.7.1972 waxaa loo akhriyi doonaa sidatan:
   1. Kala wareejinta xaqa lahaanshaha hantida maguurtada ah ee dhexmarta laba dhinac oo nool (tra vivi), shuruudaha kale ee Sharcigu tilmaamayo ka sokow, waxaa looga baahan yahay rikhsad (nuull'osta) uu bixiyo Wasiirka Wasaaradda Lacagtu, marka laga reebo xaaladaha ku tilmaaman Qodobka 5aad, xarfaha (a) iyo (b).

   2. Notaayaha, Maxkamadda iyo Garsooraha u idman u kala qoridda dhinacyada qoraallada kala wareejinta waxaa ka reebban in ay kala wareejin sameeyaan iyaagoon helin rukhsadda faqradda sare ku sheegan.

   3. Degmadii aan lahayn notaayo, Maxkamadda ama Garsooraha qabanaya xilkaas waxaa xaddidaya Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

b) Qodobka 5aad ee Sharci lambar 67 ee 2.7.1972 waxaa loo beddelay loona akhriyi doonaa sidatan:

Qod.5aad

1. Tilmaamaha ku qoran Sharcigan lagu dhaqi maayo hantida soo socota:
   a) dhammaan hantida maguurtada ah ee uu nidaaminaayo Sharciga maalgelinta shisheeye;

b) kala wareejinta xaqa lahaanshaha hantida maguurtada ah ee ay sameeyaan Hay'adaha Garsoorku iyo kala wareejinta dhexmarta Hay'adaha Qaranka (organi pubblici).

2. Kala wareejinta ay sameeyaan Hay'adaha Garsoorka waxaa loola jeedaa kuwa ku yimaadda go'aan maxkamadeed (ordinanza).

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan geliyaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15.12.1986

Madaxweynaha J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

# QAYBTA LABAAD

## XEER

Xeerka Madaxweynaha JDS lanbar 1 ee 17.12.1986:
Meelmarinta Heshiis dhexmaray Dawladda JDS iyo Dawladda Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha, kuna saabsan iskaashi Dhaqaale iyo Farsamo.

**MADAXWEYNAHA J.D.S.**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY | Qod. 67, faqradda 5 iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka; |
| MARKUU ARKAY | Sharciga lambar 49 ee 23ka Disembar 1984 oo ku saabsan Wax ka beddelidda Dastuurka; |
| MARKUU ARKAY | Sharciga lambar ee 17ka Disembar 1986 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman; |
| MARKUU TIXGELIYEY | in ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo; |

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeeka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meemariyey Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Dalka ee Shiinaha ee ku saabsan iskaashiga dhaqaale iyo farsamo, laguna kala saxiixday Magaalada Muqdisho taariikhdu markey ahayd 23ka maarso 1986.

Qod. 2aad

Heshiiska wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.12.1986

Madaxweynaha J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

**Decree No. 1 of 17.12.1986**
**Instrument of ratification.**

THE PRESIDENT

HAVING SEEN the Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN the Law No. 49 of 23.12.1984;

HAVING SEEN the Law No. 49 of 17.12.1986 on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED the nacessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

the following Decree:

Article 1

The Agreement on economical and technical Cooperation between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the People's Republic of China, signed in Mogadishu on March 23rd, 1986, is hereby ratified.

Article

The Agreement shall have a force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 17.12.1986

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

**Xeer Madaxweynaha JDS L. 2 ee 8 Dis. 1980**
**Magacaabid J.L. Madoobe Nuunoow Maxamed**

MADAXWEYNAHA J.D.S.

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 94aad ee Dastuurka J.D.S. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 82aad ee Dastuurka J.D.S. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 43aad qeybtiisa 2aad ee Shar-ciga lr. 6 ee 12.2.1980 ee Golayaasha Shacbiga iyo Maamulka Gobollada. |
| MARKUU ARKAY: | Talada Wasiirka Wasaaradda Arrimaga Gudaha, dhagaystayna Guddoomiyaha Maamulka Dawladda gobolka Bay. |

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Jaalla Madoobe Nuunoow Maxamed, Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Diinsoor iyo ku-xigeenkiisa, Jaalle Maxamuud Cabdi Axmed, waxaa laga qaaday xilka Guddoomiyeni-mada Golaha Shacbiga Degaanka iyo Guddoomiye ku-xigeenka, waxaana lagu caddeeyey ka dib markii ay gudan waayeen xilkoodii in laga qaaday ayna ka dhaceen xubinimada Golaha Shacbiga Degaanka.

Qodobka 2aad

Waxaa kalo la oggolaaday in xubnaha keydka u ah Golaha Shacbiga ee degaanka deg. Diinsoor laga buuxiyo 2da (labada jago ee ka bannaanaatay xubnaha Golaha Shacbiga degaanka ee deg. Diinsoor.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxwey-naha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho, 8 Dis. 1986.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA J.D.S.

**Xeer Wasaaradda Arrimaha Gudaha L. 1 ee 30 Okt. 1986 Magacaabid Guddi Gurmad heer Gobol iyo Degmo.**

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

| | |
|---|---|
| ISAGOO ARKAY: | Dastuurka J.D.S. |
| ISAGOO ARKAY: | Sharci Lr. 30 ee 30.7.1984 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha; |
| ISAGOO ARKAY: | Qodobka 8aad iyo 9aad ee Sharci Lr. e ee 12.2.1980; |
| ISAGOO ARKAY: | Dastuurka J.D.S. |
| ISAGOO TIXGELIYEY: | Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Guddiga Gurmadka ee heer Gobol iyo Degmo.- |

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

In la magacaabay Guddiyo Gurmad heer Gobol iyo Degmo u xilsaaran wax ka qabadka dhibaatada abaarta, duufaanada, fataha webiyada, dabka halista ah iyo dhibaato kasta oo wax u dhimi karta bulshada, waana sidatan:

XUBNAHA GUDDIGA HEER GOBOL

1. Gudd. Maamulka Dawladda ee Gob. - Guddomiye
2. Gudd. ku-xigeenka Dawladda ee Gob. - Xubin
3. Taliyaha Qeybta Booliska ee Gob. - Xubin
4. Isuduwaha Qrsheynta ee Gob. - Xogheyn
5. Isuduwaha Caafimaadka ee Gob. - Xubin
6. Isuduwaha Beeraha ee Gob. - Xubin
7. Isuduwaha X. Xool. Dhirta iyo Daaqa - Xubin
8. Isuduwaha Gaadiidka Cirka iyo Dhulka - Xubin
9. Isuduwaha Wak. Hor. Biyaha Gob. - Xubin
10. Isuduwaha Wak. Hor. Beeraha Gob. - Xubin
11. Isuduwaha Wak. Ganacsiga Ummadda Gob. - Xubin
12. Madaxda Ciidamada heer Gobol - Xubno

## XUBNAHA GUDDIGA HEER DEGMO

1. Gudd. Maamulka Daw. Degmada - Guddoomiye
2. Gudd. Golaha Shacbiga Degaanka - Gud. K/Xigeen
3. Xoghaya Daw. Hoose ee Deg. - Xoghaye
4. Taliyaha Saldhigga Booliska Deg. - Xubin
5. Maamulka Caafimaadka Deg. - Xubin
6. Maamulaha Beeraha Deg. - Xubin
7. Maamulaha X. Xool. Dhirta iyo Daaqa - Xubin
8. Maamulaha Gaad. Cirka iyo Dhulka - Xubin
9. Maamulaha Wak. Hor. Biyaha - Xubin
10. Maamulaha Wak. Hor. Beeraha - Xubin
11. Madaxda Ciidamada heer Degmo - Xubno

### Qod. 2add

Xilka iyo waajibaadka guddiyada waa: Isuduwidda, Kormeerka iyo dejinta ku talo-galka qorshaha ka hortagga dhibaatooyinka ku xusan qodobka 9aad, xubnihiisa 4aad ee sharciga lr. 6 ee 12.2.1980, iyagoo la kaashanaya ururrada bulshada iyo dadweynaha.

### Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30.10.1986.

S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla
Xubin Guddiga Siyaasadda
Wasiirka Arrimaha Gudaha

**Xeer Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee Doorashada**
**Lam. 1 ee 12 Dis. 1986.**

GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA
GUDDOOMIYAHA GUDDIGA DHEXE EE DOORASHADA

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Dhammaan Diiwaannadii Guddiyada doorashada ee degmooyinka dalka oo idil, kuna sameeyey tirakoob codadka oggolaaday Madaxweynenimada JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, kuwii diiday iyo kuwii aan ansaxin. |
| MARKUU HUBSADAY: | In habka codbixinta lagu dhawray Sharciga doorashada iyo Dastuurka JDS. |
| MARKUU ARKAY: | Diiwaanka hawlaha Guddiga Dhexe ee Doorashada. |
| MARKUU TIXGELIYEY: | In ay lagama maarmaan tahay in la faafiyo, lana gaarsiiyo dadweynaha natiijada kama dambeysta ah ee ka soo ifbaxday doorashadii ka dhacday dalka JDS 23/12/1986. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobbada 1aad, 2aad, 45aad, 46aad, 47aad, 48aad ee sharciga doorashada Madaxweynaha lam. 30 ee 16/11/1986. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka 80aad ee Dastuurka J.D.S. iyo isbeddelka lagu sameeyey Shari Lam. 49 ee 23/12/1984 ee Dastuurka. |

WUXUU SOO SAARAYAA

In natiijadii kama dambeysta ahayd ee doorashada Madaxweynenimada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ay noqotay sida soo socota:

— Wadarta guud ee tirada codbixiyeyaasha waa: 4.869.120
— Tirada codadka oggolaaday waa: 4.865.691 - 99.92%
— Tirada Codadka diiday waa: 1.463 - 00.03%
— Tirada Codadka aan ansixin waa: 1.966 - 00.05%.

SIDAA DARAADDEED

a) Guddiga Dhexe ee doorashada wuxu caddeynayaa in Jaalle Maxamed Siyaad Marre uu ku guulaystay dorashada ka dhacday dalka JDS maalinta 23/12/1986, dadweynaha Soomaaliyeedna ay si toos ah ugu doorteen inuu noqdo Madaxweynaha JDS muddada 7da sano ee soo socota.

b) In Jaalle Maxamed Siyaad Barre uu yahay laga bilaabo taariikhda natiijadan gaafinteeda Madaxweynaha Sharciga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

t) In lagu faafiyo natiijada ka soo baxday doorashada kor ku xusan Faafinta Rasmiga ah ee JDS muddo 5 maalmood gudaheeda laga bilaabo taariikhda lagu dhawaaqay.

Muqdisho, 28/12/1986

(Dr. Axmed Xasan Sheekh Cabdulle)
Guddoomiyaha Gudd. Dhexe ee Doorashada